



Bulshada waxaa lagu martiqaaday kulan ah sidii ay caawimo uga geysan lahaayeen naqshada dib-u-dhiska Dugsiga Dhexe Kellogg ee cusub

Naqshada dhismaha Dugsiga Dhexe Kellogg ee cusub waxa ay marayaan heer lagu farxo, iyada oo Dugsiayda Dadweynaha Portland uu fursad dahabi ah u fidinayo bulshada ku nool nawaaxiga Kellogg in ay ka qeybqaataan heerarka kala duwan ee ay marayso naqshada dhismaha iskuulku.

Waxa sidoo kale fursad u heli doona inay fikaradooda ku soo biiriyaan xubno ka mid ah dadweynaha kuwaasi oo lagu martiqaadayo inay ka soo qeybgalaan shirka soo socda ee Kulanka-shaqeedka Naqshada Dhismaha ee la qabanayo maalinta Sabtida, Febraayo 10keeda, saacadu marka ay tahay 9:00 subaxnimo ilaa duhurkii, iyada oo lagu qabanayo shirkani Dugsiga Sarre ee Franklin qolka fadhiga, cinwaanka iskuulka Franklin ee ah 5405 SE Woodward St. Dadweynaha ka soo qeybalaya waxa loo diyaariyey haddii ay caruur la socot daryeelayaal u xannnaaneeyo inta shirku socdo caruurta iyo turjubaano ka caawiyo luqadaha kala ah Isbaanish, Soomaali, Shiine, Fiitnaamiis, iyo Ruush. Waxa iyana sidoo kale laguu sii diyaariyey quraac fudud saacadu marka ay tahay 8:30 subaxnimo.

Kulan shaqeedkani wuxuu ku bilaabmi doonaa in si guud loo eego Wajiga Koowaad ee Naqshada iyo Qorshaha Guud Naqshada iyo waliba sida ay Guddida Tallo-bixinta Naqshadu iyana ugu biirin lahaayeen aragtidooda naqshada. Bulshada waxaa loo soo bandhigi doonaa bandhig ay kala qeybqaadan karaan si toosa kooxda naqshada sameynyeysa iyo xubnaha Guddida Tallo-bixinta Naqshada sidii ay wax uga ogaan lahaayeen naqshada dhismaha ee la soo jeediyey. Kulan shaqeedkan wuxuu fursad gaar ah sidoo kale siinayaa dadweynuhu inay ku soo kordhiyan aragtidooda kala duwan iyo wixii fikrado ah nidaamka naqshada dhismaha. Kooxda naqshada ee Kellogg waxa ay ku soo biirin doonaa wixii warcelin ah ee ay dadweynaha ka helaan nidaamka naqshada loogu sameynayo dhismaha inta ayna u gudbin wajiga labaad ee naqshada lagu horumarniyo.

Jadwalka dhismaha ee waqtigan wuxuu ka bilaabmayaa xilliga gu'ga ee sanadka 2019 ilaa 2021. Ardayda cusub ee ugu horeysa waxa loo qoondeeyey inay bilaabaan waxbarashada Kellogg sanad-dugsiyeedka 2021-2022. Inkastoo aan wali la habeyn iskuulada ay ardaydu uga iman doonto iyo xuduudaha iskuulka cusub ee Dugsiga Dhexe Kellogg, dhammaan bulshada ku nool nawaaxiga iskuulka waxaa lagu martiqaadaya in ay ka soo qeybgalaan qeybaha kala duwan ee naqshada iskuulka. Kulan shaqeedka naqshada wuxuu ku koobnaan doonaan qorsheynta iyo naqshada dugsiga dhexe ee cusub, laakiin lagama hadli doono wada-hadalada iyo go'aanada xuduudaha si gaar ah ee degmada.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan waxaad booqataa (Shabakada mashruuca) [project website](#). Waad ku mahadsan tiihin gargaarka aan naga siineysaan sidii loo dhisi lahaa Dugsiga Dhexe Kellogg ee cusub.

-David Mayne